KULAN QADO SHARAF **DUCO IYO HAMBALYO** LOOGU DIRAYAY MADAXWEYNAHA CUSUB EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Maanta oo ay taariikhdu ahayd 31 Janaayo 2009, waxaa uu Danjiraha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ee Indonesia Danjire Maxamuud Colow Barow qado sharaf u sameeyay Ganacsatada, Culumaa'udiinka, Dhallinyarada iyo Martisharaf ku sugan magaalada Jakarta. Qado sharafta, waxaa sidoo kale marti ka ahaa Xildhibaan Aadan Maxamed Cali, Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Bulshada iyo Deegaanka ee Baarlamaanka FKMG ah oo ah rug cadaa siyaasadeed, xilal ilaa heer wasiir ahna ka soo qabtay dawladdii burburka ka hor.

Ugu horreyn, waxaa hadal kooban oo soo dhaweyn iyo mahadnaq usoo jeediyay martida Danjire Colow oo uga mahadceliyay sida walaaltinimada leh ee ay uga ogolaadeen martida inay kala soo qeybgalaan qada shartaas loogu talo galay in layskaga wareysto xaaladda uu dalku marayo iyo horumarada siyaasadeed ee soo kordhay. Danjiraha wuxuu warbixin kooban ka siiyay Xildhibaanka iyo martida kaleba hawsha ay safaaraddu hayso iyo xilliyadii adkaa ee lasoo maray, xiriirka labada dawladood iyo horumarka laga gaaray dhinacyada iskaashiga oo uu cadeeyay in is faham wax ku ool ah laga gaaray sidii ay dawladda Indonesia gacan uga geysan lahayd taageerida dhismaha qaranka Soomaaliyeed, taasoo Indonesia ay muujisay xilligii koobnaa ee ay ka mid ahayd Golaha Ammaanka iyadoo ka soo horjeesatay mashruuca la dagaallanka burcad badeeda haddii aan lagu darin qodob caddeynaya dhowrista qaranimada Soomaaliyeed.

Danjiruhu wuxuu kaloo cadeeyay in ay jiraaan dhinacyo badan oo laga gaaray isfaham sida in ay gacan naga siiyaan horumarinta beeraha, kalluumaysiga, dhismaha adeega bulshada, waxaana uu cadeeyay in uu hadda socdo qaabkii ay Indonesia uga taageeri lahayd dawladda Soomaaliyeed dhanka tababarrada saraakiisha dawladda si loo kordhiyo tayada hawleed ee ay ugu adeegi lahaayeen Qaranka Soomaaliyeed. Ka dib, Danjiruhu wuxuu ku boorriyay martida dhamaan in lasoo dhaweeyo natiijada shirka Djibouti, si dhibka jiro looga baxo, loona duceeyo madaxda qaranka in Ilaahay waafajiyo sida kheyrka u ah wadanka iyo shacabka Soomaaliyeed, wuxuuna hadalka ku soo dhaweeyay Xildhibaan Aadan Maxamed Cali.

Xildhibaaanka ayaa uga mahadceliyay Danjiraha sida hagar la'aanta leh ee uu u suurageliyay furitaanka Safaaraddan oo uu sheegay in aanay ahayn hawl sahal lagu qaban karo ama qof kaliya uu dusha iska saari karo. Xildhibaanku wuxuu sidoo kale uga mahadceliyay kulankan uu Danjiruhu soo abaabulay oo ay ka soo qeybgaleen xubnaha Ganacsatada, Dhalliyarada, Culumaa udiinka iyo martisharaf ku sugan magaalada Jakarta ee Indonesia, una mahadceliyay dhamaan inta ka soo qeybgashay.

Xildhibaan Aadan oo ka hadlayay xaaladda uu wadanku marayo ayaa yiri: (… *wadanku maanta waxa uu ku sugan yahay cid waliba waa ay ka dheregsan tahay, Soomaaliyana waa ay sumaysan tahay: sun dagaal, sun aqoon-darro, sun dhaqaale xume, sun siyaasad-darro iyo kuwo kale oo ka sii xanuun badan. Maanta waxaa billaabmaya weji cusub oo siyaasad iyo hoggaaneed ee yaynan dhicin lug ku dheganaansho, meelna gaarimeyno haddaan cid waliba ka hornimaano, tanaasul ayaa loo baahan yahay, wada shaqeyn ayaa loo baahan yahay…anigu oday Soomaaliyeed baan ahay, Xildhibaan Baarlamaanka ka mid ahna waan ahay, waxa meesha ka socdana waan iska ognahay odayaasha oo wixii talo ah waaan ka soo dhiibtay. Odaynimadaas ayaana dawrkeyga ah oo diyaar la'ahay wixii khibrad iyo macluumaad aan hayo inaan ku biiriyo dhismaha qaran Soomaaliyeed oo badbaadiya shacbigeena dhibbooday..*)

Xildhibaanka ayaa isagoo ka hadlaya dhanka degenaashaha iyo waxwada qabsiga dawladaha gobolka waxa uu yiri: (… *la dhaqanka dawladaha deriska ah waxay u baahan tahay caqli deggan oo ka ambaqaadaya maslaxadda dalka iyo dadka iyo qorshe siyaasadeed oo ka dhex jillaaban kara danaha faraha badan ee dhex yaala dawladaha gobolka si ku dhisan wax wada qabsi iyo is-ixtiraam. Soomaaliya dhulkeeda kama rarmayo meesha ay kaga taal caalamka deriskana sidoo kale, sidaa daraadeed, waa in caqligu shaqeeyaa oo aan danaheena aqoonsanaa, haddii kale haraatiyaha nagu dhacayo kama soo kabsan doono…*)

Ka dib, Xildhibaanku waxa uu ka jawaabay su'aal ahayd sida looga gudbi karo wax qeybsiga qabiil oo dad badan xasaasiyad ka qabaan ayuu Xildhibaanku yiri: (… *marka hore qeybtan waxa keenay iyadoo aan lahayn wax sal ah oo wax lagu saleeyo, dadku wuxuu isu laayay qabiil, nabarradii colaada ayaa weli damqanayay, si markaas loo ilaaliyo halbeega beelaha ayaa la yiri sidee wax loo qeybiyaa, ka dibna waxaa soo baxay qaabkaas, waxay ahayd dadaal la raadiyay in wax lagu xalliyo, waana ka imaan kartaa doodoo illeyn baanii'adam caqligiis ayay ka timide, waxaanse leeyahay sida looga bixi karo waa innagoo taageerna heshiiskaas hadda la gaarayo dawladdan cusub ee hadda la dhisayo ee uu Madaxweynaha u yahay Sheekh Shariif Sheekh Axmed oo aad wada garanaysaan, aan u wada duceyno in Ilaahay nooga dhigo tii dhibta looga baxayay, ka dibna waxaa loo gudbi doonaa doorasho shacbi ah iyo mid axsaab ku dhisan (one-man-one-vote) taas oo meesha ka saari doonta halbeeggan weli xasaasiyadu ka jirto…*)

Intaas ka dib, waxaa marlabaad hadalkii qaatay Danjire Colow oo uga mahadceliyay Xildhibaan Aadan Maxamed Cali waqtiga qaaliga ah ee uu siiyay in uu kala soo qeybgalo qadosharaftaas, isagoo u sheegay martisharafta in Xildhibaanka uu ka yimid Malaysia oo uu u joogay arrimo caafimaad, dhowaana uu noqon doono, kana qeybqaadan doono sidii loo xoojin lahaa dhismaha dawlada qaran, wuxuuna hoosta ka xariiqay in Xildhibaanku yahay shakhsi indheer hogaaminayay, kana soo shaqeeyay bahweynta waxbarashada iyo bulshada si wadaniyad ku jirto ugu soo adeegay qaranka Soomaaliyeed mudooyinkii uu hayay xilalka qaran ee heer Wasiir.

Ugu dambeyn Xildhibaanku wuxuu ku ammaanay odayaasha ka soo qeybgalay qadosharaftaas sida wanaagsan ee ay isaga warhayaan, ugana murgayaan dhibaatada ka jirta wadankeena, kulana dardaarmay in gacmaha lays qabsado si loo wada samatabixiyo dalkeena burburay.

Wuxuuna ku soo gebageboobay farxad iyo wanaag.

Wabillaahi Towfiiq

Safaaradda Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ee Indonesia
Jl Salak No. 5, Guntur, Jakarta Selatan 12980, Jakarta
Email: somaliemb@indo.net.id